

Qodobada Muhiimka ah ee Wasiirka Waxbarashada.

1. Agabyo ayaa lala wadaagi doonaa qoysaska si asbuucle ah billowga Abril taariikh 6- 13.
2. Ardeyda ay aheyd in ay ka gudbaan koorsooyinka bisha Janaayo waxey u gudbi doonaan heerka xiga bisha Sibtember.
3. Macalinka canugaada ayaa kula soo xiriiri doona mudo asbuuc gudihiis ah.
4. Waxaa jiri doona labadii asbuucba hal mar in uu macalinka canugaada uu idinla soo xiriiro.

Waxbarashada Guriga ayadoo loo eegayo heerka waxbarasho

Hababka guriga wax looga barto si qoraal iyo tirsi ahaanba ee K-2

- Celcelis 1 saac maalin kasta (5 saacadood asbuucii)
- Kor u aqri maalin kasta
- Hawlo jir ahaaneed iyo ciyaaro taasoo ka caawineysa caafimaadka maskaxda iyo xirfadaha horumarineed

Hababka guriga wax looga barto si qoraal, tirsi, iyo seynis ahaanba ee 3-5, aad

- Celcelis 1 saac maalin kasta (5 saacadood asbuucii)
- 30 daqiiqo maalin kasta oo aqrin ah
- 30 daqiiqo maalin kasta oo leyli ah

Hababka guriga wax looga barto si qoraal, tirsi, seynis, iyo cilmiga bulshada 6-8, aad

- Celcelis 2 saacadood maalin kasta (10 saacadoo asbuucii)
- 30 daqiiqo maalin kasta oo leyli ah
- 30 daqiiqo maalin kasta oo aqrin ah

Hababka guriga wax looga barto si qoraal, tirsi, seynis, cilmiga bulshada, horumarinta xirfadaha shaqsiyadeed 9-10, aad

- Celcelis 2.5 saacadood maalin kasta (12.5 saacadood asbuuc kasta)
- 30 daqiiqo maalin kasta oo leyli ah
- 30 daqiiqo maalin kasta oo aqrin ah

Heerka 11-12, aad

Waxbarashada waxaa diirada lagu saarayaa dhibciyaha ugu sareeya ee koorsooyinka iskuulka kuwaasoo isugu jira Xisaabta, Ingiriisiga, Seyniska/ Tiknoolojiyada, Taariikhda/cilmiga bulshada

- Ugu yaraan 2.5 saacadood maalin kasta
- 30 daqiiqo maalin kasta oo aqrin ah
- 30 daqiiqo maalin kasta oo leyli ah

Dhammaan ardeyda heerka 12, aad ee heysta ugu yaraan 12 dhibcood oo deyn ah wey qalan jebin doonaan waxeyna heli doonaan dibloomada dugsiga sare

Wixii su,aal ah ama cabasho ah fadlan la xiriir xubnaha kooxda qeybta Ingiriisiga ama Faransiiska